

Waxbarashada Farshaxanka?

Madoonaysaa in aad balaadhisid kartidaada?

Madoonaysaa in aad qaadid talaabada uguhoreysa ee ku wajahan xag farshaxameed.?

Madoonaysaa in aad wax barashadaada aad sii wada tid kadib marka aad dhameysatid? waxbarashadaada dugsiga sare?

Madoonaysaa in aad baratid waxtarka ay u leedahay farshaxanka iyo dhaqamada?

Haddaba waxbarashadan farshaxanku waa mid ku gu haboon.

In aad shaqaysid ama aad wax barashadaada aad sii wadatid.

Haddii aad xiisaynaysid in aad ka shaqeysid mustaqbala farshaxanka ama dhaqamada. Waxa aad hadaba aad ku talagashaa in aad wax barashadaada aad sii wadan doontid kadib marka aad wax barashadaada dugsiga sare aad qalinjabisid. Waxaad kalatashankartaa ama aad weydiinkartaa (studie-och yrkesvägledare) qofka u qaabilsan waxbarashooyinka, kaas oo aad su aalikartid waxbarashada aad u baahantahay ee ah in aad baratid, si markaa aad u noqotid qof buuxinkara maadooyinkii lagarabo oo wax barashada aad doonaysid in aad baratid aad u gashid.

Waad barankaraysaa wax barashooyinka kale ee kaladuwan ee jira, ee aan aheen farshaxanka iyo dhaqamada. Waa in aad diyaar aad u tahay in aad dooratid wax barasho dugsiga sare.

Waxbarashadaas oo ah mid buuxinkarta inaad sii wadatid kadib marka aad qalinjabisid wax barashada dugsiga sare.

Shaqooyinka aad helikareysid

Tusaala ahaan waxa laga shaqeyn karaa shaqooyinka kala ah sida qaab sameynta shayga ama walxaha, muuqaal sameynta warshadaha, muuqaal sameynta qalabyada, macalinimo, qoob-kacayaarka macalinnimo, sawir qaade, farsame yaqaan dhawaaqa muusiga, kaniisad kaheese, tiyaatar macalin. tiyaatar dhise. Si haddaba aad u heshid shaqooyinkan waa in aad wax barashadaada aad sii wadataa kadib marka aad dhameysatid waxbarashadaada dugsiga sare.

Waxbarashadu waxa ay ka kooban tahay.

Wax barashadan farshaxanka iyo dhaqanka waxa ay ka koobantahay casharo. Ku waas oo ay casharada qaarkood ay ku tahay qasab ardayda in ay dhigtaan. Laakin waxaa jira casharo kale oo u gaar ah waxbarashadan Waxaa kaloo intaas dheer in ay jiraan casharo kale aad adugu gaar ahaan aad dooran kareysid.

Waxbarashadani waxa ay leedahay afar takhasusood oo kaladuwan. taas oo macnaheedu ay tahay ardayda dhamaan dhiganaysa waxbarashadan farshaxanka iyo dhaqamada kuna sugan dhamaan dalka oo dhan iyo nawaaxigiisa, waxa ay doorankaraan marba kii ay doonayaan in ay ku takhasusaan. waxaa laga yaabaa in meelo kale aadka heshid waxbarashooyin kale, ku waas oo lagayaaba in ay adiga ay kugu haboon yihiin. Waxaad weydiinkareysaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada (studie och yrkesvägledare)

Takhasuska guud waxaa ka mid ah.

- Sawirid –iyo Qaabsameyn – waxa uu ku siinayaa aqoon balaadhan iyo aqoon bilow ah oo kusaabsan habka sawiritaanka iyo qaab sameynta, is lamarkaana kuu sahlaya in aad ku takhasuustid maado ka mid ah maadooyinkaas aad baranaysid, ama qalabyaal gaar ah.
- Qoob ka cayaar- waxaad barandoontaa ama aad ka fahmidoontaa waxa uu yahay qoobka cayaarku, ku waas oo aad kubaran doontid tababar, hindisid, iyo casharo.
- Muusiga- waxaad helidoontaa fursad ah in aad sii baratid qalbka muusiga, ama heesaha.
- Rewaayadaha- waxaad baran doontaa aqoon aad u sii sareysa oo la xidhiidha tiyaatarada, kuuna sii sahli doonta in aad aqoontaada sii balaadhiso, sida ahddii aad doonaysid in aad noqotid qof wax matela.

Xidhiika suuqa shaqada

Waxbarashadan farshaxanka iyo dhaqanku ku majiraan in ardaygu uu sameeyo tababar xirfadeed in ta uu dugsiga sare uu ku jiro, laakinse waxaa suurto gal noqonkarta in aad tababar aqoon kororsi ah aad sameysid inta wax barashada aad ku jirtid. Tababaradaas oo noqondoona kuwa laxidhiidha marba waxa aad baraneysid ama wax barashada aad dooratay.

Laakinse haddii aad leedahay xidhiidh ama ey jiraan wax aad adigu gaar ahaan aad xiiseynaysid, waxay kuu fu dureenkaan sidii aad u tiigsan laheyd hadafkaaga iyo waxa aad adigu doonaysid.

Mustaqbalka iyo shaqooyinka

Waxaa dhici karta shaqooyinka farshaxanka ama dhaqanka in ay kugu adkaadaan sidii aad shaqo aad ku heshid. Waxaa kaloo surtogal noqonkarta inaad shaqo aad weydid marka xataa aad ka qalinjebisid waxbarashooyinka kale kale aad kabaxdid oo aan aheen waxbarashada dugsiga sare.

Dadka dhigtay farshaxanka iyo dhaqanka aad ayey ugu badan tahay shaqo la aantu, laakinse inta aad wax barashada aad ku jirtid waxa xoogeysanaya, yeelandoontaa karti iyo dadaal badan iyo isku kalsooni. Kaas oo markaa aad isticmaalidoontid mustaqbalka, una isticmaali doontid shaqo kasta oo aad doontid in aad ka shaqeysid.